Adiga laguma siin sharciga degganaanshaha dalkan Finland

Waaxda socdaalka waxaa ay codsigaagi magangalyoddoonka ahaa ka gaartay go'aan diidmo ah. Waxaa loola jeedaa, in iyadoo lagu salaynaayo hawlahaagii magangalyoddoonka aadan helin sharcigii degganaanshaha dalkan Finland.

Haddii aad codsigaagii magangalyoddoonista ka sokow samaysay codsi kale oo dheerad ah oo ku saabsan sharciga degganaanshaha, Waxaad heli doontaa go'aan gaar ah oo arrinkaas khuseeya.

Wakiilkaaga, qareenkaaga arrimaha sharciga iyo shaqaalaha xerada qaxootiga, kulligood way ku caawinayaan

Sidoo kale wakiilkaaga waxaa mar walba loo dirayaa wargelinta ku saabsan go'aankaaga.

Wakiilkaaga, qareenkaaga iyo shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa ku siinaya talooyinka ku saabsan, waxa arrinkaan xiga ee soo socda..

Go'aanka kaddib si iskaa ah ayaad dalka uga bixi kartaa, ama racfaan ayaad ka qaadan kartaa go'aanka

- ### Iskaa u noqoshada

Haddii aadan racfaan ka qaadanayn go'aankaaga, oo aad doonayso in aad ku laabato dalkaagii hooyo si iskaa ah. Waxaad codsan kartaa caawimaadda la siinayo qofka si iskiis ah u laabanaaya. Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa adiga kaala talinaaya qaabka loo codsado caawimaaddaas.

Iskaa u laabashada waxaa ku xiran shardiga ah, in waalidkaa ama qofka kaa mas'uulka ah uu ku qaabilaayo marka aad noqoto.

Shuruudda ku xiran siinta caawimaaddaas, waa in aad si iskaa ah uga tagtaa dalkan Finland. Waxaa waajib kugu noqonaysa in aad iska kansasho codsigaagii magangalyoddoonka qaxootinnimo, ama racfaankii aad ka samaysay go'aankii la xiriiray arrinkaas.

Faahfaahinta dheraadka ah ee la xiriirta dib u laabashada aan khasabka ahayn waxaad ka heleysaa bogga internetka ee Waaxda socdaalka: https://migri.fi/paluu

- **Waxaad racfaanka go'aankaaga u diri kartaa maxkamadda maamulka**

  Waxaa heleysaa tilmaanbixin ku saabsan sida racfaanka loo samaynayo oo ku lifaaqan go'aanka. Dukumintakaa waxaa loogu yeraa racfaan qaadashada. Qareenka ayaa kuu samayn doona racfaanka, isagoo adiga kaa wakiil ah. Wakiilka ayaa isna sido kale arrinkaas kaa caawinaya.

- **Maxkamadda maamulka ayaa go'aan ka gaaraysa racfaankaaga**

  Haddii ay maxkamadda maamulku diiddo racfaankaaga, waxaad wali ka codsan kartaa maxkamadda sare ee maamulka, oggolaanshaha racfaan qaadashada. Ma ay baaraan dhammaan racfaannada oo dhan.

  Maxkamadda maamulka iyo maxkamadda sare ee maamulkaba waxaa ay
  - burin karaan ama diidi karaan go'aanka
  - amri karaan, in codsigaaga mar labaad la falanqeeyo
  - amri karaan in adiga lagu siiyo sharciga degganaanshaha ama
  - la diido racfaankaaga.

  Marka aad racfaanka ka qaadato go'aanka Waaxda socdaalka, Waaxdu ma ahan mar dambe hay'adda dawladda ay falanqaynaysa arrinkaaga.

  Haddii aad adiga iyo wakiilkaaga qabtaan su'aalo la xiriira arrinkaaga, amaba aad doonayso in aad soo dirto caddaymo dheeraad ah, Wakiilkaaga ayaa la soo xiriiraaya qareenkaaga, ama maxkamadda maamulka oo ah cidda arrinkaaga gacanta ku haysa

Go'aanka waxaa laguugu sheegay, goorta uu go'aanku yahay mid dhaqangalaaya

Adiga laguuma oggolaan in lagu siiyo sharciga degganaanshaha dalkan Finland, iyadoo lagu saleynaayo codsigaaga magangalyoddoonka qaxootinnimo. Go'aanka waxaa laguugu sheegay, goorta uu go'aanku yahay mid dhaqan gelaaya. Booliska ayaa ka mas'uul ah dhaqangelinta go'aanka.

Go'aanka dal ka saarista waxaa loola jeedaa, in haddii aad adiga nafsad ahaantaada aad ka bixi weydo dalkan Finland, booliska ayaa dalka kaa saaraaya. Inta aan dib laguu celin kahor, boolisku waxaa uu hubin doonaa, in adiga dalkaagii laguugu qaabilayo si ammaan ah, islamarkaana uu yahay mid haboon oo nidaamka waafaqsan.

Waxaa isla waqtigaa la amri karaa in aadan dalka soo geli karin. Waxaa arrinkaa loola jeedaa, in aadan dib ugu soo laaban karin dalkan ama dalalka la isku yiraahdo shengen-ka. Diidmadu waa mid shaqaynaysa illaa iyo amar dambe, ama mid waqti loo qabtay leh. Waxaana arrinkaan laguugu sheegayaa go'aanka.

Booliska ayaa diyaarinaya dib u celinta, taasoo loola jeedo in uu adiga kuu diyaarinaayo tigidhkii, waxaa boolisku ay ku gaynayaan illaa iyo xadka Finland ama illaa iyo dalkaagii hooyo.

Hawlwadeennada dawladdu waxaa ay amri karaan in aad ku sii noolaato goob la isla ogyahay

Haddii uu arrinku yahay in adiga dalkan Finland lagaa saaro, booliska ama hoggaanka ilaalada xudduudka, ayaa adiga ku amri kara in aad sii degganaato goob la isla ogyahay, oo aad halkaas si joogto ah isaga diiwaangeliso. Inta badan goobtaas, waa isla goobtii aad ku nooleyd mudadii ay socotay falanqaynta codsigaaga. kahor intaasna adiga, wakiilkaaga iyo sooshaladdaadaba waxaa laga waraysan doonaa arrinkaan.

Haddii aad ka weyn tahay 15 sano, laakiin wali aadan qaangaarin, waxaa lagu geyn karaa waaxda haynta kummeelgaarka ah. Si kastaba waa arrin dhif ah. Ilmaha da'doodu ka yar tahay 15 sano, marnaba lama gaynayo waaxda haynta kummeelgaarka ah.

Haddii aad hayso sababo cusub oo aad ku codsan karto magangalyda qaxootinnimada, waad samayn kartaa codsiga cusub

Haddii aad hayso sababo cusub oo aad ku codsan karto magangalyada qaxootinnimada, kaddib marka go'aanka Waaxda socdaalka ee codsigaagii uu yahay mid dhaqnggal ah, waxaad samayn kartaa codsi cusub oo magangalyddoonka qaxootinnimada ah. Codsiga cusub waa inaad samaysaa islamarka aad hayso sabab cusub ama aad u baahan tahay.

- **Waan in aad sheegtaa sababta aad arrimahan cusub ee aad hayso hore ugu sheegi wayday**

Sababta ah, maxaad hore ugu sheegi wayday arrimahan cusub ee aad codsiga labaad ku salaynayso, waa in ay noqotaa arrin aadan awosodin in aad saamayn ku yeelato. Intaa kaddib Waaxda socdaalku waxaa ay qiimaynaysaa, In ay codsigaag dib u baarayso iyo inkale. Haddii Waaxda socdaalku ay u aragto , in aadan haysan sababo cusub oo ku saabsan codsiga magangalyoddoonka qaxootinnimo, waxaa lagaa gaari doonaa go'aanka ku saabsan, in aan codsigaaga la baarayn. Go'aankaasna waxa lagu soo wargelin doonaa adiga iyo wakiilkaaga.

Waxaad hubisaa xuquuqdaada shaqo qabasho

Haddii aad ka weyn tahay 15 sano,aadna ka shaqaysay dalkan Finland, waxaad islamarkiiba hubisaa go'aankaaga, in xuquuqdaadii shaqo qabasho ay wali shaqynayso iyo inkale.

Go'aanka waxaa laguugu sheegay, waqtiga ay xuquuqdaada shaqo qabasho bilaabanayso. Haddii aad shaqayso, Si dhakhso ah ugu sheeg shaqo siiyahaaga, haddii xuquuqdaada shaqo qabasho ay dhammaatay. Wakiilka ayaa sidoo kale arrinkaan kaa caawinaaya.

Waxaad ka heleysaa faahfaahin dheeraad ah

- Bogga internetka ee Waaxda socdaalka: migri.fi/turvapaikka-suomesta
- Fiidiyowga Waaxda socdaalka "Go'aanka diidmada ah": migri.fi/videot-turvapaikanhakijoille